# Dhalinyarada soo socota

## Warbixin ku saabsan waxbarashada oo loogu talagalay dhallinyarada iyo waalidkood









Daabicista 5aad, cadadka 1aad, 2007
© Xuquuqda buuggan waxaa iska leh: Wasaaradda waxbarashada, 2007

**Tafatirka**
Søren Lærkner, Jeppe Johansen, Lisbeth Jensen iyo Birgit Heie

**Tafatiraha soo saaray**
Lisbeth Jensen

**Jaangoynta garaafigga ah**
Falk & musen

**Daabacday**
Svendborg Tryk

**Turjumay**
Flygtningehælpens Tolkeservice

**Sawirrada**
Peter Dahlerup

Buuggan waxaa la helaa isagoo daabacan iyo isagoo inernetka ku jira
Cadadka daabacan: ISBN: 978-87-7791-262-7
Cadadka Internetka: ISBN: 978-87-7791-261-0
cadadka internetka waxaa laga helayaa: www.vejledningsviden.dk, “Værktøjer”

**Soo saarista buuggan waxaa iska kaashaday Wasaaradda Waxbarashada iyo Wasaaradda Qalobixinta**

**Waxaa daabacay**
Studie og Erhverv
Kratbjerg 201
3480 Fredensborg
T: 4848 5505
E: se@se.dk
www.se.dk

# Tusmo


**Hordhac** **33**

**Gacanqabo ilmahaagu si uu u yeesho mustaqbal fiican** **4**

**Latalin ku saabsan waxbarashada iyo shaqada** **6**

**Waxbarashooyinka dhallinyarada** **9**

**Waxbarashooyinka xirfadda** **11**
- Gudagalka waxbarashooyinka xirfadda (EUD) 13
- Qaab dhismeedka waxbarashooyinka 15

**Waxbarashooyinka dugsiyada sare** **19**
- Dugsiga sare ee caadiga ah (Stx) 22
- Dugsiga sare ee ganacsiga (Hhx) 23
- Dugsiga sare ee farsamada gacanta (Htx) 24
- Dugsiga sare ee carbiska(Hf) 25

**Fursado dheeraad ah** **27**
- Fasalka 10aad 27
- Dugsiga hoyga 29
- Dugsiga waxsoosaarka 30
- Waxbarashada asaasiga ah ee xirfadda - egu 32
- Waxbarashada dhallinyarada ee gaarka ah 33
- Waxbarasho gaar ah oo la siiyo dhallinyarada goor danbe timi 33
- Dugsiga dhaqaalaha guriga iyo hawlgacmeedda 34
- Dugsiga dhallinyarada 34

**Warar muhiim ah** **35**

# Hordhac

## Giddi dhallinyaradu waxbarasho ayey mudan yihiin - waxaase qudhooda laga rabtaa shuruud!

Dhallinyaradu waxay haystaan fursado badan oo waxbarasho, markay dhammeeyaan fasalka 9aad. Buuggan kooban – oo shirkadda Studie og Erhverv u diyaarisay Wasaaradaha Waxbarashada iyo Qalabixinta – waxaa laga akhriyi karaa waxbarashooyinka dhallinyarada iyo fursadaha u bannaan.

Baarlamanku waxay bishii juun ee sannadka 2007 dejiyeen xeerar dhisaya oo horumarinaya marinka u dhaxeeya dugsiga hoose/dhexe iyo waxbarashooyinka dhallinyarada, kuwaasoo xoojinaya talooyinka la siiyo dhallinyarada iyo waalidkood. Isbedellada lagu sameeyey fasalka 10aad, koorasyada hordhaca ah ee la raaciyey fasalka 8aad, buundadhigga lagu daray fasalka 9aad iyo ka 10aad, hawlgelinta mantarrada, isbedellada ku soo kordhay maaddadaha waxbarashooyinka xirfadda iyo latalinta jihaysan ee dheeraadka ah, intuba waxay culays wayn saarayaan, in dhallinyaro badani galaan oo dhammaystaan waxbarashada dhallinyarada. Sidaas way mudan yihiin dhallinyaradu, bulshaduna way u baahan tahay.

Waa muhiim inay dhallinyaradu helaan waxbarasho. Taasi uma garantii garaynayso shaqo, haseyeeshee waxay kordhinaysaa fursadaha ay shaqo ku helayaan iyo inay qaataan mushahar sare. Waxbarashadu waxay kaloo waxtar u leedahay horumarka shakhsiyadda qofka dhallinyarada ah, intuu nool yahay.

Shuruud baa laga rabtaa dhallinyarada. Waa inay si firfircoon uga qaybgalaan cashar bixinta, si fiicanna ugu diyaar garoobaan. Waxaa kaloo jira dhawr maaddadood, oo ay tahay in loo feejignaado, dhallinyaraduna ka soo baxaan.

Waa talo fiican inay xaddiga ugu badan ee suurtagal ah ka helaan, wararka khuseeya fursadaha waxbarashooyinka jira.

## Caawimo iyo taageero

Waxaa jira waxbarashooyin aad u fara badan oo la kala dooran karo. Sidaas awgeed waxay dhallinyaradu u baahan yihiin in la taageero oo lala taliyo, si ay u doortaan waxbarasho sida qaalibka ah ay ka soo bixi karaan. Waalidku raad wayn ayuu ku leeyahay doorashada waxbarashada ee dhallinyarada, sidaas awgeed waa muhiin inay wax ka yaqaanaa waxbarashooyinka iyo suuqa shaqada, si ay ilmahooda uga caawin karaan wuxuu dooranayo. Waa muhiim in doorashada waxbarashadu ka shidaal qaadato awoodaha, xiisaha iyo rabitaanka dhallinyarada, isla markana u bisil yihiin inay bilaabaan kana soo baxaan waxbarashada.

Waa muhiim inay jiraan waxyaabo(natiijo) waalidku ka filayaan waxbarashada ilmahooda. waxyaabo aan sarrayn oo horseedin in ilmuhu iska soo taago waxbarashada, iyo waxyaabo aan hoosayn oo horseedin in ilmuhu u babac dhigi waayo turunturrooyinka waxbarashada.

Buuggan koobani wuxuu biniixinayaa waxbarashooyinka badan iyo fursadaha jira. Faahfaahin dheeraad ah iyo taloba waxaa laga heli karaa lataliyaasha waxbarashada dhallinyarada (UU-vejlederne) iyo bogga internetka ee www.ug.dk.



Mahadsanidin

Bertel Haarder
Wasiirka Waxbarashada

# Gacanqabo ilmahaagu si uu u yeesho mustaqbal fiican

Waxbarashadu waa furaha shaqada. Dalkan waxaa u caado ah, cid kastana laga filaa, in giddi dhallinyaradu wax bartaan. Waxbarashadu waxay kordhisaa fursadaha lagu gaadho nolol fiican, shaqo iyo mushahar sare, iyo inuu qofku isku fillaan karo. Waxbarashadu sidoo kale waxay suurtagelisaa, in bulshada laga helo xoog-shaqo oo aqoontiisu sarrayso, taasoo lagu jiri karo hodanimadeenna.

## Waxbarashadu waa muhiim

Waxbarashadu sida badan waa lama huraan si loo helo shaqo joogto ah. Baadhitaanno la sameeyey ayaa muujinaya, qofka aan wax barani, inuu halis wayn ugu jiro shaqo la'aan. Badi Shaqooyinka waxaa qofka la waydiiyaa waxbarasho – ugu hoosayn waxbarasho dhallinyareed (ungdomsuddannelse), sida qaalibka ahna tacliin sare (videregåendeuddannelse). Waqti dheer ayey qaadan katraa, dadaalna way u baahan tahay waxbarashadu, haseyeeshee qofka way kobcisaa, waanu ka mafsuudaa.

Horumarka bulshadu dhinac walba xoog buu uga koray, waxbarashada iyo shaqaduna maaha keligood kuwa xawliga daran ku socda. Sidaas awgeed waa in qofku wax barto oo tacliin sare higsado intuu nool yahay oo dhan. Waxaa kaloo muhiim ah inuu indhaha ku hayo, lana







socdo isbedellada cusub ee soo kordhaya. Waa muhiim sidoo kale, markuu qofku waxbarasho dooranayo, inuu garanayo waxay ka kooban tahay iyo shaqada ay horseedayso.

## Waxbarasho aan loo kala hadhin

Waxa maanta jira fursado badan oo waxbarasho aan hadda ka hor jirin. Waxbarashooyinka qaarkood waa dar laga dhigto buugag oo aragti ah, qaar kalena waa dar gacanta laga qabto oo farsamo ah (håndværkmæssige). Waxbarashooyinku way kala muddo dheer yihiin, qaar baa gaaban, qaarna way dheer yihiin. Waxbarashooyinka qaarkood baa dhawr heer ka kooban, sida waxbarshooyinka xirfadda (erhversvuddannelser), kuwaasoo qofku xidhan karo marar kala duwan, dabadeedna dib ugu soo laabmi karo oo halkii ka sii wadi karo.

Waxbarashooyinku siday u dhan yihiin shuruud baa ku xidhan. Waxbarashada aragtida ah waa in wax badan la akhriyo lana qoro. Waxbarashada farsamo la xidhiidhana waxaa culays la saaraa waxyaabo qofku gacanta ka qabto, waana in qofku ku wanaagsan yahay maadadaha waxbarashooyinkaasi ku xidhan yihiin sida af dheenishka iyo xisaabta. Waxbarashooyinka qaarkood waxaa lagu qaataa mushahar, qaarkoodna kaalmada waxbarashada ee dawladda (SU).

# Iatalin ku saabsan waxbarashada iyo shaqada

Arrinka la halmaala doorashada waxbarashada iyo shaqada, waxaa badanaa fiican in wax laga waydiiyo lataliye, kaa caawin kara helitaanka waxbarashada iyo shaqada. Lataliyeyaashu (vejledere) waxay aqoon fiican u leeyihiin lana socdaan waxbarashooyinka iyo shaqada, waxaana ay awood u leeyihiin inay dhallinyarada ka caawiyaan siday u heli lahaayeen waxbarasho habboon. Sidaas awgeed la xidhiidh xarunta latalinta waxbarashada dhallinyarada ee aagga aad deggan tahay.

Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah magacyada loo adeegsado latalinta:

- **UU**: Latalinta waxbarashada dhallinyarada (Ungdommens Uddannelsesvejledning).
- **UU-center**: Xarunta latalinta waxbarashada dhallinyarada.
- **UU-vejleder**: Lataliyaha waxbarashada dhallainyaradu - waa khabiir, dhallinyarada iyo waalidkood kala taliya waxbarashada iyo shaqada.
- **Uddannelsesbog**: Buugga waxbarashadu - waa qoraal faahfaahiya sida ardaygu u soo shaqeeyo/ardayaddu u soo shaqayso dugsiga hoose/dhexe (grundskolen), iyo siday ugu niyad samaayeen.
- **Uddannelsesplan:** Qorshaha waxbarashadu waa qoraal faahfaahiya doorashada ardayga ee waxbarashada iyo wuxuu ku talajiro inuu sameeyo mustaqbalka.
- **SU**: kaalmada waxbarashada ee dawladdu (Statens Uddannelsesstøtte) waa deeq uu codsan karo qof kastoo da'diisu ka wayn tahay 18 sano.

### Latalinta waxbarashada dhallinyarada (UU - Ungdommens Uddannelsesvejledning)

Dhammaan dhallinyarada da'doodu tahay ilaa 25 jirku, waxay Latalinta waxbarashada dhallinyarada ka heli karaan talooyin la xidhiidha waxbarashada iyo shaqada. Latalinta waxbarashada dhallinyarada, waxay dugsiyada iska kaashadaan maaddadaha la bixiyo, oo dhallinyarada ka caawin kara inay doortaan waxbarashada. Latalinta waxbarashada dhallinyarada, waxaa dalkoo dhan agaasima Xarumaha latalinta waxbarashada dhallinyarada.

### Lataliyaha waxbarashada dhallinyarada (UU-vejleder)

Lataliyaha waxbarashada dhallainyaradu wuxuu bartay inuu dhallinyarada iyo waalidka kala taliyo waxbarashada iyo shaqada. Lataliyuhu wuxuu qofka ka caawiyaa helitaanka wararka waxbarashooyinka kala duwan, iyo shuruahaa la iska rabo si loo galo waxbarashooyinkaas. Dhallinyarada iyo waalidku waxay lataliyaha ka ogaadaan waxbarshada qofku wadi karo ama ay tahay inuu is qoro.

Lataliyuhu wuu la socdaa dhammaan waxbarashooyinka, haseyeeshee waxaa muhiim ah, in waalidka iyo dhallinyarada qudhoodu muujiyaan xiise ay ku raadinayaan fursadaha kala duwan. Fursadahaas waxaa laga ogaan karaa bogga www.ug.dk, iyo in la booqdo goobaha kala duwan ee waxbarashada ama in qalab ka hadlaya laga soo ergisto rugkutubeedka.

### Latalinta dugsiga hoose/dhexe (grundskolen)

Dugsiga hoose/dhexe waxaa ardayda iyo waalidka tilmaama, lataliyaha waxbarashada dhallinyarada iyo macallimiinta.

Lataliyaha waxbarashada dhallinyaradu, wuxuu bixiyaa talooyin shakhsi ah. Taasoo ka dhigan, inuu dhallinyarada kala hadlo waxbarashada iyo shaqada. Waxaa kaloo uu ardayda ka caawiyaa inay sameeyaan buugga waxbarashada. Fasalka 9aad ama ka 10aad ayey ardaydu qorshe waxbarasheed oo shakhsi ah ku soo gebagebeeyaan buuggooda waxbarashada, halkaas oo ay ku qoraan waxbarashada ay doorteen.

Waa muhiim, in waalidku la socdo, waxa ubadkoodu maskaxda ku hayo muddada ay dugsiga dhiganayaan. Waa fikrad fiican, inay akhriyaan, ubadkoodana kala hadlaan, waxyaabaha ku qoran buugga waxbarashada iyo qorshahooda waxbarashada. Ka dib dugsiga hoose/dhexe, markay waalidku saxeexayaan qorshaha waxbarashada, waa muhiim inay garanayaan waxbarashada ilmahoodu doortay.

### Dugsiga hoose/dhexe dabadii – dhallinyaro bilawday waxbarasho

Marka la bilaabo waxbarashada dhallinyarada, waxaa la adeegsan karaa lataliyaha meesha waxbarashada laga bilaabay. Wuxuu qofka ka caawin karaa dhammaan xaaladaha waxbarashada.

### Dugsiga hoose/dhexe dabadii – dhallinyaro aan bilaabin waxbarasho

Dhallinyarada ka yar 25 jir, ee ka soo baxay fasalka 9aad ama ka 10aad, waxay talo ka heli karaan xarunta latalinta waxbarashada dhallinyarada ee aagga ay deggan yihiin. Arrintani waxay khusaysaa dhallinyarada aan bilaabin waxbarasho, ama kuwa bilaabay ee haddana joojiyey, iyagoon dhammaysan.

### Xarunta latalinta waxbarashada dhallinyarada ee aaggaaga

Caawimo dheeraad ah ka doon xarunta latalinta waxbarashada dhallinyarada ee aagga aad deggan tahay – cinwaanka iyo lanbarkeeda tilifoonka waxaad ka helaysaa dugsiyada, rugkutubeedka ama barta internetka ee www.ug.dk.



## Qalabka doorashada waxbarashada

**Buugga waxbarashada (fasalka 6aad ilaa ka 10aad)**: waa qalab latalineed oo ardaydu qoraan intay dugsiga dhiganayaan. Ardaydu waxay kaga warramaan xaaladdooda, iyo siday u qabtaan hawlaha dugsiga. Waxaa kaloo ay kaga warramaan mustaqbalka ay ku riyoonayaan iyo waxbarashada ay ku talajiraan.

**Qorshaha waxbarashada (fasalka 9aad ilaa ka 10aad)**: Waa qorshe shakhsi ah, oo lagu faahfaahiyo waxyaabaha ardaygu rabo iyo waxbarashada uu doonayo. Waxaa kaloo uu ka kooban yahay faahfaahin tilmaanta waxyaabuhu qofku ku fiican yahay iyo talooyinku la kulmay. Qorshaha waxbarashadu wuxuu ardayga la socdaa ilaa fasalka 10aad, ama ilaa waxbarashada dhallinyarade ee uu doorto. Waana inay wadajir u saxeexaan lataliyaha, waalidka iyo ardaygu.

**Tababar xirfadeed**: Ardaydu intay fasalka 9aad ku jiraan, waxay caadi ahaan isku dayaan inay tababar xirfadeed kaga shaqeeyaan shirkad muddo wiig iyo wax la jira ah. Ardaydu waxay fursad u helaan inay tijaabiyaan shaqooyin kala duwan si ay u eegaan, bal inay xiiseeyaan barashada shaqo gaar ah, markay dugsiga ka baxaan.

**Koorasyo hordhac ah**: Ardayda fasalka 8aad, waxay muddo kooban ka qaybgeli karaan mid ama dhawr ka tirsan waxbarashooyinka dhallinyarada si ay fikrad uga qaataan fursadaha waxbarashooyinkaas iyo shuruudahooda.

**Buundadhig (brobygning)**: Wuxuu qayb ka yahay fasalka 9aad* iyo ka 10aad. Ardaydu waxay ka qaybgalaan mid ama dhawr ka tirsan waxbarashooyinka dhallinyarada, si ay u ogaadaan inay ka bixi karaan waxbarashooyinkaas, inay xiiseeyaan barashada maaddadaheeda, kuna niyad samaadaan shaqada ay horseedayso. Buundadhigga waxaa lagu qaadan karaa dugsi xirfadeed ama dugsi sare.


**Mantar (mentor)**: waa qof wayn, oo caawiya lana taliya ardayga dhallinyarada ah ee wax baranaya. Ardayda fasalka 9aad oo markay u gudbaan waxbarashada dhallinyarada, halis ugu jirta inay soo foodsaaraan dhibaatooyin, waxay caawimo ka heli karaan mantar, gacan qaban kara hadday tahay shakhsiyan iyo haddey tahey maadadahaba.*

* wuxuu hirgelayaa 1da ogost 2008



# Waxbarashooyinka dhallinyarada

Jaantuuska hoose wuxuu si fudud u muujinayaa – isagoo weliba soo bandhigaya noocyada waxbarashooyinka qaarkood – fursadaha kala duwan ee waxbarasheed ee qofka horyaal markuu dhammeeyo fasalka 9aad ama ka 10aad. Fallaadhuhu waxay tilmaamayaan in waxbarashooyinku horseedi karaan shaqo ama waxbarasho kale. Bogagga soo socda ka akhri mid kastoo waxbarashooyinkeer ka mid ah.




### Sababo fiican oo dartood wax loo barto.

- Fursado wacan oo shaqo
- Mushahar sare
- Kobcidda shakhsiyadda qofka
- Isku kalsooni
- Mudnaan.

### Qofka wax baranayaa waa inuu:

- Rabo wuxuu baranayo
- Ilaaliyo waqtiga imaanshaha marwalba
- Raacdo casharrada
- Si firfircoon uga qaybgalo waxbarashada
- Is xilqaamo oo naftiisa ku tashado.






# Waxbarashooyinka xirfadda

Waxbarashooyinka xirfadda (EUD) waxaa loogu talagalay dhallinyarada rabta shaqo, isugu jirta farsamo gacmeed (praktisk) iyo aqoon maaneed (teoretisk), taasoo looga jeedo in la isticmaalo muruqa iyo maskaxda labadaba. Shaqadu waa mid la taaban karo, qofkuna badanaa si toos ah ayuu u arki karaa natiijada waxqabadkiisa.



Ka dib fasalka 9aad iyo ka 10aad, waxay dhallinyaradu waxbarasho xirfadeed ka bilaabi karaan – dugsi xirfadeed, shirkad ama machad. Halkaas waxaa qofka lagu baraa shaqo la xidhiidha laan xirfadeed ama farsamo gacmeed.

Waxbarashooyinka oo dhammi waxay qofka u suurtageliyaan inuu shaqeeyo, ama iskii u samaysto shirkad uu leeyahay. Hadduu doonana, tacliin sare ayuu sii wataa.

## Waxbarashooyin kala duwan

Waxaa jira waxbarashooyin xirfadeed oo kala duwan oo la kala doorto. Waxbarashooyinkaasi way badan yihiin, waxaanay qaataan muddo u dhaxaysa 1½ - 5½ sano. Qaar ka mid ah ayaana hoos ku xusan:

Qofka raba waxbarasho la xidhiidha gaadiidka iyo sahaysiinta, wuxuu dooran karaa darawalnimo ama bakhaarhaye. Qofka raba inuu ka shaqeeyo qaybaha gaadiidka (transpotmidler), wuxuu tusaale ahaan dooran karaa makaanig ama alxanle.

Xagga dhismaha, tusaale ahaan qofku wuxuu baran karaa jaajuurka, farsamada bishilka (teknisk isolator) ama mishiinka nijaaradda.

Dhinaca adeegga dhismayaasha la deggan yahay iyo taakulaynta dadka deggan, wuxuu qofku dooran karaa waxbarashooyinka kalkaaliyaha adeegga (serviceassistent), waardiyaha ama farsamayaqaanka adeegga hantida ma guuraanka ah (ejendomsservicetekniker).

Qofka raba inuu ka shaqeeyo xoolaha, dhirta iyo dabeecadda, wuxuu dooran karaa waxbarashooyinka sida jirdiino beere (anlægsgartner), beerwale, farsamayaqaanka dhirta iyo daaqa (skov – og naturtekniker). Hadduu qofku rabo inuu cuntada ka shaqeeyo, wuxuu dooran karaa tusaale ahaan gasaar, cuntakariye sare (gastronom) iyo mudalab.

Xagga daryeelka jidhka iyo xarragada, qofku wuxuu dooran karaa waxbarashooyinka rayislaha  iyo qurxiyaha, xagga miidhiyahana tusaale ahaan soosaarista filimada iyo tv-ga.

Dhallinyarada doonaysa, inay ka shaqeeyaan dukaan, xafiis – ama bangi – waxay dooran karaan waxbarashooyinka sida kalkaaliyaha iibka (salgsassistent), karraaninimada (kontoruddannelsen), iyo waxbarashada agaasinka lacagta(finansuddannelsen).

Waxsoosaarka iyo horumarintu waxay ka kooban yihiin liis dheer oo waxbarashooyin ah sida makaanig, balaastikle (plastmager) iyo alxanle(teknisk isolatør). Haddii xiisaha qofku u janjeedho dhinaca korontada, maamulka iyo kombuyuutarka (IT), wuxuu qaadan karaa waxbarashooyinka sida obaraytar (procesoperatør), farsamada kombuyuutarka(datateknik), farsamayaqaanka mishiinnada otomaatigga ah (automatiktekniker) ama korontayaqaan (elektriker).

Dhallinyarada danaynaysa dhinacyada caafimaadka, daryeelka ama barbaarintu, waxay dooran karaan waxbarashooyinka sida kalkaaliyaha bulshada iyo caafimaadka ama kalkaaliyaha kilinigga ilkaha (tandklinikassistent).

### Kadimada (Indgange)

- Laga bilaabo bisha ogost 2008, dhammaan waxbarashooyinka waxaa loo kala qaybiyey kooxo kadin wadaag leh (fællesindgange):
- Gaadhiga, dayuuradda iyo qaybaha gaadiidka
- Dhismaha
- Adeegga dhismayaasha la deggan yahay iyo taakulaynta dadka deggan
- Xoolaha, dhirta iyo dabeecadda
- Daryeelka Jidhka iyo xarragada
- Cuntada dadka
- Waxsoosaarka miidhiyaha
- Ganacsiga (Merkantil)
- Waxsoosaarka iyo horumarinta
- Korontada, agaasinka iyo kombuyuutarka
- Caafimaadka, daryeelka iyo barbaarinta
- Gaadiidka iyo sahaysiinta.





## Gudagalka waxbarashada xirfadda (EUD)

### Bilawga waxbarashada

Waxbarashada xirfadda waxaa loo bilaabi karaa saddex siyaabood:

- In la galo dugsi (skoleadgangsvejen), oo qofku qaybta asaasiga ah ee waxbarashada ka bilaabo dugsi
- In la bilaabo tababar farsameed (praktikadgangsvejen), oo qofku shirkad ku soo tababarto ka hor intaanu bilaabin qaybta asaasiga ah ee waxbarashada
- In la qaato carbis xooggan (mesterlære), oo qofku tababar farsameed ka qaato shirkad sannadka hore, muddadaas gudaheedana dugsiga uu ka qaato casharro aad u yar.

Dhallinyarada rabta waxbarashada gundhigga ah ee barbaarinta (pædagogisk grunduddannelse) ama waxbarashada kalkaaliyaha bulshada iyo caafimaadka, qofku wuu u madaxbannaan yahay inuu qaato qaybta asaasiga ah iyo in kale, hadduu ka dib fasalkii 9aad soo qaatay ugu yaraan sannad waxbarasho ama khibrad shaqeed ah.

**Waxaan ahay farsamayaqaan qasabadaha iyo dhuumaha ah (blikkenslager).** *Xirfaddan waa in qofku helo goob tababar. Meelo badan baan la xidhiidhay, ilaa aan helay goob tababar – shirkad baan tijaabo ku galay, waxaan tusay inaan dedaalayo iyo inaan goonni keliday u shaqayn karo. Hadda xoog baan ugu faraxsan ahay shaqadayda.*

*Khaalid, 24 sano*

### Shuruudaha gelitaanka

Qofka doonaya inuu bilaabo qaybta asaasiga ah ee waxbarasho xirfadeed, waa inuu soo qaatay waxbarashada qasabka ah ee ku qeexan xeerka dugsiga dadwaynaha, tusaale ahaan waa inuu soo dhammaystay fasalka 9aad. Si uu qofku u galo qaybta sare ee waxbarashadana, waa inuu soo gudbay imtixaankii qaybta asaasiga ah, waxbarashooyinka badidoodana waxaa laga rabaa inuu hayto goob tababar.

### Tiro go'an baa gasha (adgangsbegrænsning)

Waxbarashooyinka xirfadda qaarkood waxaa sannad walba la qaataa keliya tiro go'an oo arday ah, iyadoo ardaygu heshiis waxbarasheed la soo gelay shirkad mooyaane. Tan macnaheedu waxaa weeye, tirada ardayda la qaataa way xaddidan tahay.

Waxbarashooyinka qaarkood, sida maaddada halabuurnimeed ee miidhiyaha (kreative mediefag), marka horeba tiro go'an baa loo qaataa qaybta asaasiga ah ee waxbarashada. *

* Waxay hirgelaysaa 1da ogost 2008

Waxbarashooyinka kale, sida waxbarashada gun-dhigga ah ee barbaarinta iyo waxbarashada kalkaaliyaha bulshada iyo caafimaadka, qaybta sare ee waxbarashada oo keli ah ayey xaddidan tahay tirade ardayda la qaataa.

Qofka soo hela goob tababar oo maaddadiisa khusaysaa, waa la qaadanayaa.

### Hubantida waxbarashada (uddannelsesgaranti)

Dhammaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin, markay dhammeeyaan qaybta asaasiga ah, inay sii wataan waxbarasho hoos timaadda kadinka (fællesindgangen) ai doorteen.

Haseyeeshee ma kala dooran karaan waxbarashooyinka isku kadinka ah (fællesindgang). Qofku wuxuu xaq u leeyahay inuu bilaabo waxbarasho, loo qoondeeyey tiro go'an oo arday ah, hadduu la yimaaddo goob tababar.

### Waxbarashada (undervisning)

Waxbarashada waxaa lagu dhigtaa dugsiyada xirfadda (erhvervskoler)

### Latalinta (vejledning)

waa muhiim in qofku la xidhiidho lataliyayaasha waxbarashada ama xirfadda ama macallinka qaabilsan (kontaktlæreren), hadduu dhibaato kala kulmo waxbarashada ama ku qanco inuu waxbarashada joojiyo.

Dhammaan goobaha waxbarashooyinka xirfadda waxaa jooga lataliyayaal waxbarasheed iyo kuwo xirfadeed, kuwaasoo caawiya ardayda. Qofka waxaa talo iyo tilmaan laga siiyaa tooggo kasta, oo saamaysa la socoshada waxbarashada, raacashada casharrada, qabatinka wax-dhigashada, niyadda imw.

Waxaa kaloo had iyo jeer qofka lagu soo dhaweeyaa, inuu la xidhiidho lataliyaha waxbarashada dhallinyarada, oo ka caawin kara dhammaan arrimaha khuseeya waxbarashada, iyo sidoo kale waxyaabaha ay ka mid yihiin inuu doortay waxbarasho sax ah.

### Macallinka qaabilsan (kontaktlærer)

Markuu qofku bilaabo waxbarasho xirfadeed wuxuu yeeshaa macallin qaabilsan, kaasoo gacanqabta muddada waxbarashadu socoto oo dhan. Isagoo kaashanaya macallinka qaabilsan, waa in ardaygu samaystaa

*Aad ugu maan faraxsanayn inaan dhigto dugsiga dadwaynaha.* **Hadda waxaan ahay roodhiile.** *Waxbarashada Xirfaddani waxay qaadatay saddex sannadood iyo toddoba bilood. Saddexda sannadood moofo ayaan tababar ku qaadanayey. Way hawl badnayd, haseyeeshee waxyaabo badan baan fursad u helay inaan tijaabiyo, inaan halkan ka shaqeeyana xoog baan ugu mafsuud ah.*

*Tonni, 25 sano*





qorshe waxbarasheed (eeg bogga 8). Qorshuhu wuxuu faahfaahiyaa waxbarashada ardaygu qaadanayo, muddada ay soconayso iyo maaddadaha ay tahay inuu doorto – dibuhabayn baa muddadaas dhexdeeda lagu sameeyaa qorshaha. gelişmelere göre değiştirilip uyarlanır.

### Mantar (mentor)

Waxaa suurtagal ah in lala xidhiidho mantar, muddada waxbarashadu socoto oo dhan.

Mantarnimadu waa hab gacan qabasheed. Qof wayn oo waayoaragnimo badan ayaa ardayga ka caawiya waxyaabaha la xidhiidha horumarka shakhsiyaddiisa. Dhammaan waxbarashooyinka xirfadda, waxaa ardaygii u baahda caawiya mantar, ka sokow shaqaalaha dugsiga. Waa suurtagal in qorshaha waxbarashada ardayga lagu xuso, inuu mantar u baahan yahay.

### Carbis shaqeed/Carbis horeed (Traineeforløb/forpraktik)

Dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 15 iyo 18 jir, ee dhammaystay waxbarashada qasabka ah ee ku xusan xeerka dugsiga dadwaynaha, waxay xirfadaha qaarkood heshiis kula geli karaan shirkad inay saddex ilaa lix bilood ugu shaqeeyaan mushahar, iyagoo carbis ah (trainee). Ujeedada habka carbiska noocan ahi waa, in marka danbe la galo heshiis waxbarasheed oo rasmi ah. Shaqada shirkaddu waxay ardayga siisaa aqoon uu u yeesho dhawr hawlood oo maaddad gaar ah khuseeya.

Lataliyaha waxbarashada ayaa ardayga ka caawin kara, inuu galo heshiiska carbiska shaqada. Xirfadaha qaarkood waxaa habkan loo yaqaan carbis horeed (forpraktik)

## Qaab dhismeedka waxbarashooyinka

### Aragti iyo tababar farsmeed

Waxbarashada xirfaddu waxay ka kooban tahay qayb asaasi ah iyo qayb sare, waxaana lagu dhigtaa dugsi, shirkad ama machad. Ardayga dhallinyarada ahi wuxuu waxbarashada ka bilaabi karaa dugsi ama shirkad. Gebagebada waxbarashada waxaa la qaadaa imtixaan (svendeprøve/fagprøve). Waxbarashada waxaa la rabaa in looga

qaybgalo si firfircoon oo madaxbannaan. Waa qasab in waxbarashada la soo xaadiro ama si firfircoon looga qaybgalo, markay dugsiga ka socoto iyo marka shirkad carbis loo joogaba.

Ardayga ku wanaagsan inuu farsamada wax ku barto, waxbarashooyinka badidooda wuxuu heshiis waxbarasho la geli karaa shirkad, halkaasoo uu ku qaadan karo qaybta hore ee waxbarashada. Habkan waxaa loo yaqaan carbis xooggen (mesterlære). Markuu ardayga dhallinyarada ahi soo helo shirkad uu heshiis waxbarasho la geli karo, waxaa halkaas loogu sameeyaa qorshe waxbarasho oo la xidhiidha waxay tahay inuu shirkadda ka barto – waxaa ardayga arrintaas ka caawiya dugsiga xirfadda.

Siday u badan yihiin waxbarooshinka xairfaddu, tababarka farsamada gacanta ayaa ka badan casharrada lagu qaato dugsiga.

### Qaybta asaasiga ah (grundforløb)

Dhammaan waxbarashooyinka xirfaddu waxay ku bilaabmaan qayb asaasi ah, oo waxbarashadu isugu jirto aragti iyo tababar farsameed. Qaybta asaasiga ah ee waxbarashadu waxay ka kooban tahay qayb qasab ah oo sida caadiga ah 20 wiig qaadata iyo qayb ardaygu u madaxbannaan yahay doorashadeeda.

### Baakooyinka qaybta asaasiga ah

Iyadoo ka baxsan caadi ahaan qaybtii asaasiga ahayd, waxay dugsiyadu laga bilaabo 1da janaweri ee 2008, bixinayaan qayb si gaar ah loo soo habeeyey oo la yidhaahdo baakooyinka qaybta asaasiga ah.

Baakooyinka qaybta asaasiga ah waxaa loogu talagalay ardayda aan dhisnayn ama ay ka hor timi waxbarashadu. Waxay noqon karaan tusaale ahaan kuwa xag bulsheed u baahan deggeni dheeraad ah





**Waxaan bartay kalkaaliyaha bulshada iyo caafimaadka.** *Waa inaad is aaminto. Shaqo badan ayey rabtaa waxbarashadani. Dharaar kasta waa in dugsiga la tago, casharraduna way badan yihiin. Haseyeeshee qofka is aaminaa, wuu ka dabbaalan karaa.* *Louise, 21 sano*

iyowaxbarasho fursadaheeda doorashadu yar yihiin. Dugsiyadu waxay sidoo kale baakooyinka qaybta asaasiga ah siin karaan ardayga si caqligal ah u doortay waxbarasho, tusaale ahaan ardayga galay heshiis waxbarasheed, wada waxbarasho u socota ama leh khibrad wayn oo xirfadeed.

### Qaybta sare (hovedforløb)

Qaybta sare ee waxbarashadu waxay ka kooban tahay marar dugsiga wax lagu barto iyo marar tababar lagu qaato goob shaqo. Si qofku u bilaabi karo waxbarashada qaybteeda sare, waa inuu gudbaa imtixaanka qaybta asaasiga ah, kana soo qaataa tababar (heshiis waxbarasheed) shirkad ama shaqabixiye la aqoonan yahay.

Gebagebada waxbarashada waxaa la qaadaa imtixaan (svendeprøve/ fagprøve).

### Goobta tababarka

Dugsiga xirfaddu wuxuu qofka ka caawiyaa si uu helo goob tababar, qofkuna waa inuu si firfircoon uga qaybqaataa, dhiniciisana ka raadsadaa goob tababar.

Markasta ma fududa in la helo goob tababar! Waxay u baahan tahay in ardaygu noqdo mid firfircoon, dulqaad badan oo raba inuu helo goob tababar. Waxaa muhiim ah, inaanu qofku marna quusan. Waxaa caawin kara, inuu qofku hayo shaqo xilliga firaaqada. Hadduu qofku yahay mid ay ka goan tahay inuu raadiyo, si togan u fikiraya, oo niyadsanna, wuxuu markaas fursad badan u leeyahay inuu helo. Waalidku waa inay ardayga ka caawiyaan, siduu u heli lahaa goob tababar. Adeegso sidoo kale saaxiibada, macaariifta iyo ehelkaaga kale – bal inay cid garanayaan?

### Dugsiga tababarka

Hadduu qofku waayo goob tababar, waxbarashooyinka qaarkood buu sii wadaa dugsi tababar. Taas macnaheedu waxaa weeye, inuu qofku ku qaato qaybta farasamada ah dugsi xirfadeed halkuu shirkad kaga qaadan lahaa. Waa inuu qofku muujiyo, inuu si firfircoon u raadiyey goob tababar, intaanu dugsiga tababarka bilaabin.

### Jaranjaro iyo heerar (Trin – og niveaudeling)

Badi waxbarashooyinka xirfaddu waxay u qaybsan yihiin heerar kala sarreeya, markaas wuxuu qofku fursad u helaa inuu kolba heer xidho. Heer kastaa wuxuu ku wajahan yahay shaqooyin kala duwan oo suuqa

shaqada ah. Heer kastaana wuxuu suurtageliyaa in loo gudbo heerka ku xiga.

Qofka dhallinyarada ah ee maaddad xoog u dhisan lihi wuxuu fursad u leeyahay inuu maaddada ka bilaabo heer sare. Sidoo kale qofku wuu beddeli karaa maaddad, hadday keliya ahmiyad u leedahay tacliin sare.

### Waxbarashada xirfadda ee qofka (Individuelle erhvervsuddannelser)

Ardayda qaarkood baa la siiyaa waxbarasho la yidhaahdo (individuelle erhversuddannelse), taas oo ah qaybo ka tirsan mid ama dhawr kala duwan oo waxbarashooyinka xirfadda ah, kana kooban casharro lagu qaato dugsi iyo tababar farsameed oo lagu qaato shirkad. Dugsiga iyo shirkadda ayaa wadajir u dejiya waxbarashada ardaygu qaadanayo.

### Waxbarashooyinka xirfadda ee gaaban

Waxaa jira waxbarashooyin xirfadeed oo waqtigoodu gaaban yahay. Sida waxbarashooyinka kale ayey ka kooban yihiin qayb asaasi ah iyo qayb sare. Qaybta sare ayaa sii waqti gaaban (sannad ilaa sannad iyo badh). Waxbarashooyinka xirfadda ee gaaban waxaa loo qaadan karaa si carbis xooggan (mesterlære) ah.

### Mushaharka iyo kaalmada waxbarashada ee dawladda (SU)



Qofku wuxuu ka bilaabi karaa waxbarashadiisa dugsi xirfadeed, shirkad ama machad. Qofkii waxbarashadiisa ka bilaaba shirkad ama machad wuxuu qaadanayaa mushahar intuu wax dhiganayo oo dhan. Qofkii waxbarashadiisa ka bilaaba dugsi wuxuu codsanayaa kaalmada waxbarashada ee dawladda (SU), markuu bilaabo qaybta sare ee waxbarashadiisana wuxuu qaadanayaa mushahar.

Ardayda dhallinyada ah, ee da'doodu gaadhay 18 jirku, waxay si waafaqsan xeerka u dalban karaan kaalmada waxbarashada ee dawladda (SU).

Qofku wuxuu deeqda tababarka dugsiga ka heli karaa tababaraha dugsiga (skolepraktikken).

# Waxbarashooyinka dugsiyada sare

Waxbarashooyinka dugsiyada sare waxaa loogu talagalay ardayda ku talajirta inay sii qaataan tacliin sare. Dugsiyadaasina waxa weeye:

- Dugsiga sare ee caadiga ah (3 sano). Stx - studentereksamen
- Dugsiga sare ee ganacsiga (3 sano). Hhx - højere handelseksamen
- Dugsiga sare ee farsamada gacanta (3 sano). Htx - højere teknisk eksamen
- Dugsiga sare ee carbiska (2 sano). HF - højere forberedelseseksamen

### U carbinta tacliin sare

Waxbarashooyinka dugsiyada sare waxay dhallinyarada u carbiyaan siday u geli lahaayeen tacliin sare sida jaamacadaha, kulliyadaha iyo dugsiyada kalkaaliyayaasha caafimaadka. Wuxuu qofku bartaa siyaabo kala duwan oo loo shaqeeyo iyo siyaabo wax loo dhigto. Waa inuu qofku u diyaar garoobo, in waxbarashooyinka dugsiyada sare u badan yihiin shaqo guri.

### Casharrada

Muddada waxbarashadu socoto waa inay ardaydu dhiibaan layliyo taxan, waawayn oo qoraal ah. Qofku waa inuu ku talagalo inuu casharrada raacdo maalin kasta. Waalidku waa inay u tabaabushaystaan, sidii ilmahoodu guriga ugu heli lahaa waqti iyo jawi deggan uu casharrada ku raacdo.





### Waxbarashada

Waxbarashada caadiga ah waxaa ka baxsan, oo dugsiyada sare leeyihiin booqashooyin wax-dhigasheed (studietur), kuwaasoo ah qaybta ugu muhiimsan ee waxbarashada. Halkaas wuxuu qofku ku bartaa waxyaabo ay ka mid yihiin wadashaqaynta. Waxaa intaas dheer barnaamijyo ardaydu ka wada qaybqaataan sida masrax ay galaan, matxaf ay daawadaan, iyo muxaadaro ay dhegeystaan.

## Maaddooyinka

Waxbarashooyinka dugsiyada sare waxay ka kooban yihiin maaddooyin taxan oo qasab ah, laamo waxbarasheed (studieretninger) iyo maaddooyin qofku doorto. Maaddaduhu way kala duwan yihiin oo waxay ku xidhan yihiin nooca dugsiga sare ee qofku doortay. Waxbarashada iyo imtixaannaduna waa kala heerar.

## Shuruudaha gelitaanka

Si uu qofku u galo dugsiyada stx, hhx ama htx, waa inuu:

- Dhammaystay fasalka 9aad ama ka 10aad ee dugsiga dadwaynaha ama qaatay waxbarasho u dhiganta.
- Toos u codsaday gelitaanka ka dib markuu dhammaystay fasalka 9aad ama ka 10aad.
- Gudbay imtixaannada qalinjebinta* ee qasabka ah ee dugsiga dadwaynaha.
- Soo qaatay imtixaannada waxbarasho laba ilaa afar sano loo carbiyey afka faransiiska ama ka jarmalka, hadday maaddadu tahay mid la doorto
- H aystaa qorshe waxbarasheed la ansixiyey.

Haddii macallimiinta iyo lataliyuhu ka walaacaan, inuu ardaygu wadi karo waxbarashada, waxay ka qaadi karaan imtixaanka gelitaanka (optagelsesprøve). Imtixaanku wuxuu ka dhacaa dugsiga ardaygu codsaday.



## Lataliyaha wax-dhigashada (studievejleder)

Dhammaan waxbarashooyinka dugsiyada sare waxay leeyihiin lataliyayaal wax-dhigasheed, kuwaasoo ardayda ku caawiya talooyin iyo tilmaamo la xidhiidha cashar raacashada, qabatinka wax-dhigashada iwm.

Waa muhiim in wax la waydiiyo lataliyayaasha wax-dhigashada, haddii waxbarashada laga la kulmo dhibaatooyin, ama lagu qanco joojinteeda.

*** imtixaannada qalinjebinta ee marka la dhammeeyo fasalka 9aad ee dugsiga dadwaynaha:**

- Laba imtixaan oo af dheenish ah, mid qoraal ah iyo mid afka ah
- Imtixaannada maaddadaha xisaabta, af ingiriisiga iyo fisigiska/kimisteriga
- Laba imtixaan oo laga dhex doorto maaddadaha af ingiriisiga, barashada kiristaanka, taariikhda, bulshada, juqraafiga, bayoolajiga iyo afafka jarmalka iyo faransiiska

**imtixaannada qalinjebinta ee marka la dhammeeyo fasalka 9aad ee dugsiga dadwaynaha:**

Qofku wuxuu ku qalinjebin karaa fasalka 10aad maaddadaha xisaabta, afka dheenis-hka, ingiriisiga, jarmalka, faransiiska iyo fisigiska/kimisteriga.
Waxaa kaloo qofku dooran karaa inuu ku qalinjebiyo qaar ka mid ah maaddadaha.



# Dugsiga sare ee caadiga ah (Stx)

Dugsiga sare ee caadiga ahi wuxuu culays wayn saaraa maaddadaha taariikhda, dhaqanka, sayniska iyo bulshada, waana gundhig loo doorto si loo qaato tacliin sare.

Qaab dhismeedka waxbarashada dugsiga sare ee caadiga ahi, wuxuu ka kooban yahay lix bilood oo la dhigto qaybta asaasiga ah iyo laba sano iyo badh la qaato laanta waxbarashada loo leexdo xaggeeda.

### Qaybta asaasiga ah

Qaybta asaasiga ah giddi ardayda ayaa wada qaadata. Waxaana lagu bartaa dhawr maaddadood iyo habab loo shaqeeyo, oo marka danbe loo adeegsado waxbarashada dugsiga sare.

### Laanta waxbarashada (Studieretning)

Marka la dhammeeyo qaybta asaasiga ah, waa in la doorto laan waxbarasheed, taasoo qaadata laba sano iyo badh. Laanta waxbarashada loo leexdo xaggeedu waxay ka kooban tahay saddex maaddadood, oo wadarnimadoodu tahay laan goonni ah. Maaddaduhu way isku wada xidhan yihiin, waxaana ay muujiyaan laan xaggeeda loo leexdo, oo imtixaankeeda la galo. Ardayda isku laan waxbarasheed u leexdaa, isku fasal ayey noqdaan. Laamaha waxbarashada ee dugsiyada sare way kala duwanaan karaan, haseyeeshee giddi waxay hoos yimaaddaan qaybaha kala ah: barashada dabeecadda (sayniska), cilmiga bulshada (samfundsvidenskab) ama aqoonta dadka iyo luqadaha (humaniora/sprog).

### Maaddooyin

Ka sokow maaddadaha laanta waxbarashada loo leexdo xaggeeda, waxaa la dhigtaa maaddado kaloo qasab ah sida af dheenishka, taariikhda, af ingiriisiga, xisaabta, fisigiska, diinta, cilmiga bulshada, ilbaxnimooyinkii hore, ciyaaraha iyo luqad kaloo shisheeye. Waxaa sidoo kale ay tahay in la qaato maadad halabuurnimeed (kreative fag), sida muusig ama farshaxan. Waxaa intaas weheliya ugu yaraan laba ka mid ah maaddadaha bayoolojiga, kimisteriga iyo juqraafiga.

Waxaa kaloo la dhigtaa maaddad loo madaxbannaan yahay doorashadeeda, sida maaddadda miidhiyaha (mediefag).

### Shuruudaha gelitaanka

Eeg qaybta ka hadlaysa waxbarashooyinka dugsiyada sare ee bogga 20.

*Dhab ahaan baan u hubay inaan dugsi sare gelayo, haseyeeshee waxaan xoog ugu janjeedhay ganacsiga, siiba dhoofinta iyo suuqgelinta. Sidaas awgeed waxaan ku qancay dugsiga sare ee ganaciga (Hhx) iyo dugsiga ganacsiga ganacsiga(handelsskolen). Aadna waan ugu faraxsan ahay maanta.*

*Amalie, 19 sano*





# Dugsiga sare ee ganacsiga (Hhx)

Dugsiga sare ee ganacsiga waxaa loogu talagalay ardayda danaynaysa ganacsiga iyo luqadaha. Waxaana uu gaar ahaan qofka u taabbageliyaa inuu ka shaqeeyo shirkadaha ganacsiga. Marka la dhameeyana wuxuu qofku sii wadan karaa tacliin sare.

Qaab dhismeedka waxbarashada dugsiga sare ee ganacsigu, wuxuu ka kooban yahay lix bilood oo la dhigto qaybta asaasiga ah iyo laba sano iyo badh la qaato laanta waxbarashada loo leexdo xaggeeda.

### Qaybta asaasiga ah

Qaybta asaasiga ah giddi ardayda ayaa wada qaadata. Waxaana lagu bartaa dhawr maaddadood iyo habab loo shaqeeyo, oo marka danbe loo adeegsado waxbarashada tacliinta sare.

### Laanta waxbarashada

Marka la dhammeeyo qaybta asaasiga ah, waa in la doorto laan waxbarasheed, taasoo qaadata laba sano iyo badh. Laanta waxbarashada loo leexdo xaggeedu waxay ka kooban tahay saddex maaddadood, oo wadarnimadoodu tahay laan goonni ah. Maaddaduhu way isku wada xidhan yihiin, waxaana ay muujiyaan laan xaggeeda loo leexdo, oo imtixaankeeda la galo. Ardayda isku laan waxbarasheed u leexdaa isku fasal ayey noqdaan. Laamaha waxbarashada ee dugsiyada sare ee ganacsigu way kala duwanaan karaan, haseyeeshee giddi waxay hoos yimaaddaan qaybaha kala ah dhaqaalaha, suuqgaynta (marketing) ama xaaladda ganacsiga caalamka (internationale forhold).

### Maaddooyin

Ka sokow maaddadaha laanta waxbarasheed ee loo leexday xaggeeda, waxaa la dhigtaa maaddado kaloo qasab ah sida af dheenishka, ingiriisiga, xisaabta, cilmiga bulshada, luqad kaloo shisheeye, iibka, agaasinka dhaqaalaha shirkadda, sharciyada ganacsiga, taariikhda cusub iyo dhaqaalaha adduun waynaha. Waxaa kaloo ay tahay in la qaato maaddad qofku u madaxbannaan yahay doorasheeda, sida maaddadda sayniska kombuyuutarka (datalogi), felsefedda iyo agaasinka lacagta (finansiering).

### Shuruudaha gelitaanka

Eeg qaybta ka hadlaysa waxbarashooyinka dugsiyada sare ee bogga 20.

# Dugsiga sare ee farsamada gacanta (Htx)

Dugsiga sare ee farsamada gacanta waxaa loogu talagalay dhallinyarada rabta farsamada gacanta iyo sayniska. Waxbarashadani waxay suurtagelisaa in laga shaqeeyo suuqa xirfadda (erhvervslivet) ama la sii wato tacliin sare oo hoos timaadda maaddadaha farsamada.

Qaab dhismeedka waxbarashada dugsiga sare ee farsamada gacantu, wuxuu ka kooban yahay lix bilood oo la dhigto qaybta asaasiga ah iyo laba sano iyo badh la qaato laanta waxbarashada loo leexdo xaggeeda.

## Qaybta asaasiga ah

Qaybta asaasiga ah giddi ardayda ayaa wada qaata. Waxaana lagu bartaa dhawr maaddadood iyo habab shaqeed (arbejdsmetoder), kuwaas oo marka danbe loo adeegsado waxbarashada.

## Laanta waxbarashada (Studieretning)

Marka la dhammeeyo qaybta asaasiga ah, waa in la doorto laan waxbarasheed, taasoo qaadata laba sano iyo badh. Laanta waxbarashada loo leexdo xaggeedu waxay ka kooban tahay saddex maaddadood, oo wadarnimadoodu tahay laan goonni ah. Maaddaduhu way isku wada xidhan yihiin, waxaana ay muujiyaan laan xaggeeda loo leexdo, oo imtixaankeeda la galo. Ardayda isku laan waxbarasheed u leexdaa, isku fasal ayey noqdaan. Laamaha waxbarashada ee dugsiyada sare ee farsamada gacantu way kala duwanaan karaan, haseyeeshee giddi waxay hoos yimaaddaan qaybaha kala ah: barashada dabeecadda (sayniska), tiknoolajiga ama isgaadhsiinta iyo caafimaadka (kommunikation og sundhed).

## Maaddooyin

Ka sokow maaddadaha laanta waxbarashada loo leexdo xaggeeda, waxaa la dhigtaa maaddado kaloo qasab ah sida af dheenishka, ingiriisiga, xisaabta, maaddada tiknikada (teknikfag), tiknoolajiga, taariikhda tiknoolajiga, isgaadhsiinta/kombuyuutarka (IT), maaddada bulshada, fisigis, kimisteri iyo bayoolaji. Waxaa kaloo la qaataa maaddad qofku u madaxbannaan yahay doorasheeda, sida dhaqaalaha xirfadda (erhvervsøkonomi), borogaraam samaynta (programmering), iyo af faransiiska.

## Shuruudaha gelitaanka

Eeg qaybta ka hadlaysa waxbarashooyinka dugsiyada sare ee bogga 20.





# Dugsiga sare ee carbiska (HF)



Dugsiga sare ee carbiska waxaa loogu talagalay dhallinyarada la haysa waxbarasho ballaadhan oo aragti ah, taasoo ka kooban waxyaabo la akhriyo iyo layliyo qoraal ah. Waxaa loo galaa sida dugsiyada sare ee kale. Waxaana uu ka kooban yahay waxbarasho gaaban ama dhexdhexaad ah oo si gaar ah loo qorsheeyey.

Dugsiga sare ee carbisku waa laba sannadood.

## Maaddadaha qasabka ah

Giddi waa in la qaato maaddadaha af dheenishka, ingiriisiga, xisaabta, ciyaarta iyo maaddad halabuurnimeed sida naqshadaynta iyo muusigga.
Waxaa intaas raaca laba kooxood oo maaddado ah, sida: maaddadaha dhaqanka iyo bulshada (taariikhda, diinta iyo bulshada) iyo maaddadaha sayniska (bayoolajiga, juqraafiga iyo kimisteriga).

## Maaddadaha la doorto

Waxaa loo madaxbannaan yahay doorashada ilaa afar maaddadood oo kala duwan, waa kuwa qofku rabo inuu sii wato ilaa heer sare.

## Shuruudaha gelitaanka

Qofku waa inuu:

- Soo gudbay fasalka 10aad imtixaankii af dheenishka, ingiriisiga iyo xisaabta
- Soo gudbay imtixaankii qalinjebinta dugsiga dadwaynaha ama imtixaankii fasalka 10aad ee fisigiska/kimisteriga
- Soo qaatay imtixaannada waxbarasho laba ilaa afar sano loo carbiyey afka faransiiska ama ka jarmalka, soona gudbay imtixaankii qalinjebinta dugsiga dadwaynaha ama imtixaankii fasalka 10aad
- Toos u codsaday gelitaanka ka dib markuu dhammaystay fasalka 10aad.
- Haystaa qorshe waxbarasheed la ansixiyey.

## Dugsiga sare ee carbiska dadka waawayn

Waa suurtagal in dugsiga sare ee carbiska laga qaato hal maaddo, xataa haddii dhawr sano ka soo wareegtay, markuu qofku dhammeeyey dugsiga. Qofku hadba maaddad buu sidaas ku qaadan karaa, ilaa uu wada qaato maaddadaha dugsiga sare ee carbiska, dabadeed la isugu wada daro.





# Fursado dheeraad ah

## Fasalka 10aad

Fasalka 10aad waa sannad dugsiyeed, qofku u madaxbannaan yahay inuu dhigto, waxaanu suurtageliyaa in la bilaabo waxbarashada dhallinyarada.

Fasalkan waxaa loogu talagalay dhallinyarada dhammaysay dugsiga hoose/dhexe ee rabta inay kor u qaadaan calaamadaha ay keeneen maaddadaha, iyo ardayda aan weli hubin waxbarashada dhallinyarada ay dooranayaan.

Ardayda fasalka 10aad waa inay si firfircoon uga qaybqaataan waxbarashada, waxaana suurtagal ah inay wax ka go'aamiyaan waxay tahay in la qabto xiisadaha.

### Waxbarashada

Fasalka 10aad wuxuu ka kooban yahay qayb qasab ah iyo qayb la doorto.

Qaybta qasabka ah waxaa ka mid ah maaddadaha af dheenishka, ingiriisiga iyo xisaabta. Waxaa intaas raaca layli qasab ah oo qofku doorto mawduuciisa, kaasoo la halmaala waxbarashada iyo shaqada. Layligu waa inuu xidhiidh la yeeshaa qorshe waxbarasheedka ardayga.

Dugsiyadu way ku kala geddisan yihiin maaddadaha la doorto. Waxayse tusaale ahaan noqon karaan maaddadaha ciyaarta, cilmiga bulshada, sayniska, farsamada iyo xidhiidhka ama curin hor leh.

*Waxaan rabay dugsiga sare, haseyeeshee af dheenishkaygu ma adkayn. Waxaan beddelkiisii galay fasalka 10aad oo markaan dhammeeyo aan bilaabi karayey dugsiga sare ee farsamada gacanta (Htx). Way adkayd, calaamadahayguna ma sarrayn. Haseyeeshee waan gudbay, haddana fisigiska ayaan ka dhigtaa jaamacadda Kobanheegan.* *Erkan, 22 sano*

### Buundadhig (brobygning)

Dhammaan ardaydu waa inay qaataan laba wiig oo buundadhig ah, halkaasoo ay xaadiraan casharrada lagu dhigto waxbarashada dhallinyarada. Intaas dabadeed wuxuu qofku iskii u sii wadi karaa buundadhigga ilaa afar wiig.

Waxaa kaloo suutagal ah in loo baxo tababar iyo in la booqdo shirkad. Arrintan faahfaahinteeda ka akhri bogga 8.

### Imtixaannada qalinjebinta

Marka la dhammeeyo fasalka 10aad, waxaa la kala dooran karaa in loo fadhiisto imtixaanka fasalka 10aad ama imtixaanka qalinjebinta fasalka 9aad ee dugsiga dadwaynaha.

### Qorshaha waxbarashada

Ardayga qorshihiisa waxbarashada waxaa wadajir u la sameeya guriga iyo dugsiga (lataliyaha waxbarashada dhallinyarada). Qorshuhu wuxuu gundhig fiican u noqdaa, in la doorto waxbarasho sax ah, marka la dhammeeyo fasalka 10aad.

Waxbarashada fasalka 10aad waxaa laga qaadan karaa meelo badan, sida tusaale ahaan dugsiyada dadwaynaha, xarumaha fasalka 10aad, dugsi gaar loo leeyahay ama dugsi hoy ah.





# Dugsiga hoyga

Dhallinyaro badan baa doorata inay galaan dugsi hoy ah, iyagoo xaawilaya inay isku filnaadaan, si fiicanna u bartaan shakhsiyaddooda.

Dugsiyada hoyga waxaa loogu talagalay ardayda da'doodu u dhaxayso 14 iyo 18 sano. Ardaydu waxay degaan (hoydaan) dugsiga, haseyeeshee waxay gurigooda aadi karaan marar badan oo fasaxyada wiigga ah.

Dugsiyada hoyga gaar baa loo leeyahay, waana in lala baxo qarashka jiifka. Dawladda ayaa qofka siisa kabitaan dhaqaale.

### Waxbarashada

Waxbarashadu waxay la heer iyo tusmo tahay fasallada 8aad ilaa 10aad. Dugsiyada hoyga badidooda, waxay ardaydu ka qaataan imtixaanka fasalka 9aad ama ka 10aad. Waxbarashadu waxay bilaabantaa bisha ogost oo dhammaataa bisha juun, sida dugsiyada hoose/dhexe.

Dugsiyada hoygu waxay ku yaallaan dalkoo dhan. Badi dugsiyada hoygu waxay leeyihiin tilmaamo soocan oo u gaar ah. Tilmaamahaasi waxay noqon karaan dhinacyada fikirka ama maaddooyinka, sida:

- Ciyaaraha iyo isboortiga
- Dabeecadda iyo deegaanka
- Luqadda iyo dhaqanka
- Muusiga, masraxa iyo farshaxanka
- Dhaqalaha guriga iyo nafaqada
- Waxbarasho khaas ah (specialundervisning).

Dugsiyada qaarkood ayaa waxbarasho khaas ah siiya ardayda, dhibaato ka haysato la socoshada waxbarashada.

Muuqaalka dugsiyada hoyga waxaad ka eegi kartaa www.efterskole.dk.





# Dugsiga waxsoosaarka

Dugsiyada waxsoosaarku waxay siiyaan waxbarasho ku salaysan shaqo farsameed iyo waxsoosaar, dhallinyarada aan diyaarka u ahayn inay bilaabaan waxbarshada dhallinyarada. Waxbarashada waxaa loo jaangooyaa si ku habboon qofka.

Ujeeddada waxbarashadu waa inay dhallinyarada ka caawiso horumarka shakhsiyaddooda, dhistana fursadahooda waxbarashada iyo shaqada. Dugsiga waxsoosaarka waxay dhallinyaradu ka helaan taabbgelin u horseedda inay wadi karaan waxbarashada dhallinyarada.

### Waxbarashada

Waxbarashadu waxay ka kooban tahay hawlo ka socda dhawr geerash (wershado yaryar), halkaasoo casharrada aragtida ah ay weheliyaan shaqo gacanta laga qabanayo iyo layliyo laga shaqaynayo. Waxaa intaas dheer oo dugsiyadu bixiyaan waxbarasho ka kooban maaddadaha caadiga ah, iyadoo dhallinyarada loo carbinayo siday u qaadan lahaayeen waxbarashada dhallinyarada.

Ilaa saddex daloolaw laba ka mid ah waxbarashada dugsiga waxsoosaarka, waxaa lagu qaataa dugsiyo kale. Tusaale ahaan waxay noqon kartaa in maaddadaha caadiga ah lagu qaato mid ka mid xarumaha waxbarashada dadka waawayn (VUC), ama in qayb ka mid ah maaddadaha dugsiga hoose/dhexe lagu qaato dugsi xirfadeed. Ardayda dhigata dugsiga waxsoosaarka muddo ka badan saddex bilood, waxay caadi ahaan raaciyaan waxbarasho si gaar ah loo tixgeliyo oo qaadata min laba ilaa shan wiig. Ardaydaasi waxay kaloo fursad u leeyihiin inay qaataan tababar afar wiig ah lixdii biloodba.

Waxbarashadu waxay ka kooban tahay hawlo farsameed oo wershad ama geerash ka socda, sida farsamooyinka:

- Looxa iyo birta
- Maryaha iyo naqshadda
- Kijinka iyo kaadhiinka (kantiinka)
- Beerista guryaha iyo dhul beereedka
- Cilmiga kombuyuutarka iyo isgaadhsiinta
- Muusiga/maadad halabuur.

### Mushahar

Waxaa la qaataa deeq uu bixiyo dugsiga waxsoosaarku.

### Shuruudaha gelitaanka

Dugsiyada waxsoosaarku waxay waxbarasho ugu deeqaan dhallinyarada ka yar 25 jir, ee aan soo qaadan waxbarasho dhallinyareed, ama aan buuxinayn shuruudaha lagu bilaabo waxbarashadaas, ama dhexdaba ku joojiyey waxabaradaas dhallinyarada.
Qofku waa inuu dhammeeyey fasalka 9aad – ama qaab kale u soo qaatay waxbarashadiisii qasabka ahayd.

Ka hor intaan la bilaabin dugsiga waxsoosaarka, lataliyaha dhallinyarada ayaa qiimeeya, inuu qofku soo gelayo dadkii loogu talagalay dugsiyada waxsoosaarka.

Haddii meeli ka bannaan tahay, qofku markasta wuu bilaabi karaa, ugu badnaanna wuxuu wadi karaa hal sano.

Arjiga codsiga gelitaanka waxaa loo dirayaa dugsiga waxsoosaarka ee uu khuseeyo.

Muuqaalka dugsiyada waxsoosaarka waxaa laga eegi karaa **www.produktionsskoler.dk**.

# Waxbarashada asaasiga ah ee xirfadda (egu)

Waxbarashada asaasiga ah ee xirfaddu (egu) waa waxbarasho loogu deeqo dhallinyarada ka yar 30 jir, ee aan wadi karin, buuxinna shuruudaha lagu galo waxbarashada dhallinyarada. Waxbarashada qofka ayaa loo jaangooyaa.

Waxbarashadani ugu horrayn waxay ku salaysan tahay tababar xirfadeed. Waxay isugu jirtaa muddo dugsi wax lagu dhigto iyo muddo tababar xirfadeed loo baxo. Caadi ahaan muddada waxbarashadani waa laba sano, haseyeeshee xaalado gaar ah ayaa lagu dari karaa ilaa sannad kale oo tababar xirfadeed ah.

Muddada dugsiga wax lagu dhigtaa waxay qaadataa 20 ilaa 40 wiig, caadi ahaanna waxay ka kooban tahay qaybaha waxbarashooyinka xirfadda oo kale.

Ardayga waxaa waxbarashadiisa wadajir u la habeeya lataliye. Lataliyuhu wuu la socdaa waxbarashada ardayga intuu wax dhiganayo oo dhan, haddii dhibaatooyin ka hor yimaaddaana wuu caawiyaa.

### Tababar xirfadeed

Tababarka xirfadeed waxaa lagu qaataa hal ama dhawr shirkadood, ama geerashka dugsi farsamo gacmeed, ama dugsi waxsosaar iwm.

Maadddaha la qataa waxy noqo karaan:

- Babuurta iyo biraha
- Dukaamada iyo xafiisyada
- Kijinka iyo kaadhiinka
- Dhismaha iyo qalabkiisa
- Barabtaarinta iyo daryeelka.

Waxaa suurtagal ah gacanqabasho iyo waxbarid dheeraad ah, hadduu qofku sidaas u baahdo.

### Dhaqaale

Muddada qofku ku jiro tababarka xirfadeed wuxuu qaataa mushaharka ardayda (elevløn), xilliyada uu dugsiga wax ku dhiganayana wuxuu qaataa deeqda dugsiga (skoleydelse).



### Waxbarashada asaasiga ah ee xrifadda dabadeed

Dhammaynta waxbarashada asaasiga ah ee xirfaddu, waxay qofka siisaa tayo xirfadeed iyo fursad uu ku sii wadan karo waxbarasho guud oo xirfadeed, taasoo mudnaanteeda leh.

### Shuruudaha gelitaanka

- Waa inuu qofku dhammeeyey fasalka 9aad
- Waa inay da'diisu ka yar tahay 30 jir
- Waa inaanu waxbarasho kale wadin, sida ta dugsiga waxsoosaarka
- Waa inaanu shaqayn
- Waa inaanu buuxin karin shuruudaha lagu galo waxbarashada dhallinyarada.

Arjiga codsiga gelitaanka waxaa lagu hagaajinayaa lataliyaha waxbarashada dhallinyarada.

# Waxbarashada gaarka ah ee dhallinyarada

Dhallinyarada qabta baahi gaar ah, markay dhammeeyaan dugsiga hoose/dhexe, waxaa loogu deeqaa waxbarasho dhallinyareed qaadata saddex sano. Waxbarashadan waxaa loo qorsheeyey dhallinyarada horumarkoodu gaabiyo iyo kuwa aan lahayn fursad ay ku galaan waxbarashada dhallinyarada.

Waxbarashadan waxaa loo jaangooyaa, si ku habboon heerka aqoonta iyo xiisaha qofka dhallinyarada ah. Qofka bilaabayana waa in da'diisu ka yar tahay 25 jir.

Ujeedadu waa in la kobciyo shakhsiyadda qofka dhallinyarada ah, lana horumariyo fursadaha uu ku gaadhi karo isku filnaan iyo firfircooni nololeed.

Waxbarashadan waxaa qofka qora lataliyaha waxbarashada dhallinyarada.

# Waxbarasho gaar ah oo la siiyo dhallinyarada goor danbe timi

Waxaa jirta waxbarasho si gaar ah loogu deeqo yahay dhalinyarada goor danbe timi dalka, waxaa looga jeedaa, dhallinyarada Dhenmaarig timi, iyagoo 14 jir ah ama ka wayn. Waxaa loo dhigaa maaddadaha caadiga ah, oo ay ku qaataan VUC-ga ama dugsi luqadeed, iyadoo culays la saarayo barashada af dheenishka.

## Dugsiga dhaqaalaha guriga iyo hawlgacmeedda

Dugsiyadan waxaa lagu bartaa cunto karinta, dhaqaalaha guriga, daryeelka jidhka, dharka iyo haraaqda, tolidda, midabaynta iwm. Waxaa kaloo lagu dhigaa maaddadaha caadiga ah.

Dugsiyada dhaqaalaha guriga iyo hawlgacmeedku waa kuwo gaar loo leeyahay, oo qofku bixiyo qarashkooda. Dawladda iyo kommuunaha ayaa siiya deeq dhaqaale.

Faahfaahinta la xidhiidha dugsiyadan ka akhri www.hus-haand.dk.

## Dugsiga dhallinyarada

Waxbarashada dugsiga dhallinyaradu waa mid qofku u madaxbannaan inuu qaato, waxaana loogu talagalay dhallinyarada rabta inay wax korodhsadaan. Waxbarashada waxaa la dhigtaa dharaartii iyo habeenkii, xaaladaha qaarkoodna waxay ku gebagebaysantaa imtixaan. Meelaha qaarkood wuxuu qofku qaadan karaa af dheenish siyaado ah (ilaa intuu ka gaadhayo 25 jir).

Ka qaybgalka waxbarashadani waa bilaash.

**La xidhiidh xarunta waxbarashada dhallinyarada ee aagga aad deggan tahay, si aad u ogaato faahfaahinaha la xidhiidha halka kuugu dhaw ee laga helayo waxbarashadan.**



# Warar muhiim ah

### Codsiga

Ardayda fasalka 9aad iyo ka 10aad, waxay codsadaan waxbarashada dhalinyarada sanadkii hal mar. Arjiga codsiga waxaa laga soo qaadan karaa ama laga buuxin karaa www.otagelse.dk.

Arjiga codsiga waa in ardaygu keeno dugsiga uu dhigto ugu danbyn 15ka maaris. Dugsiga ayaa arjiga codsiga iyo qorshaha waxbarashada ardayga u diraya meesha ardaygu ugu jecel yahay inuu bilaabo.

Ardayda ka baxsan fasalka 9aad iyo ka 10aad, waa inay buuxiyaan arjiga codsiga oo laga helo www.optagelse.dk, una diraan dugsiga ay ugu jecel yihiin inay bilaabaan. Codsiga waxaa la samayn karaa sannadka oo dhan.

Haddii qofku rabo inuu codsado waxbarashada asaasiga ah ee xirfadda, dugsiga waxsoosaarka ama waxbarashada gaarka ah ee dhallinyarada, waa inuu la xidhiidhaa lataliyaha waxbarashada dhallinyarada. Qofka waxaa ka caawin kara codsiga lataliyaha waxbarashada dhallinyarada ama xarunta waxbarashada dhallinyarada ee aagga uu deggan yahay.

Qofkii raba dugsiga hoygu, waa inuu codsigiisa toos ugu diro dugsiga uu rabo, waqti fiican oo inta is qoritaanku socda ah.

### Dhaqaalaha

Casharbixinta waxbarashooyinka dhallinyaradu waa bilaash. Kuma jiraan waxbarashooyinka dugsiyada dhaqaalaha guriga iyo hawlgacmeedku. Dhammaan waxbarashooyinka dhallinyarada, ardayda ayey tahay inay iska bixiyaan waxyaabaha sida qaamuusyada, makiinadaha xisaabta iyo xaashiyaha.

### Kaalmada waxbarashada ee dawladda (SU)

Marka qofku gaadho 18 jir, wuxuu codsan karaa kaalmada waxbarashada ee dawladda (SU). Inta qofku qaadanayaa waxay ku xidhan dakhliga soo gala waalidkiis, iyo inuu waalidkii guri kula nool yahay ama gaar uga deggan yahay. kaalmada waxbarashada ee dawladda (SU) ka sokow, wuxuu qofku amaahan karaa lacag dulsaarkeedu hooseeyo. Arrintani waxay sidoo kale saamaysaa dadka haysta dhalashooyin kale, ee si joogto ah u deggan Dhenmaarig. Waase inay buuxiyaan dhawr shuruudood. Arrintan faahfaahinteedana ka akhri www.su.dk.

*Weligay waan jeclaa farsamada gacanta, sidaas awgeed baan u doortay inaan barto obaraytar ( procesoperatør). In loo shaqeeyo si deggan oo habaysani, waa arrin aan ku wanaagsan ahay. Maaddadaha fisigiska iyo kimisterigana waan jeclaa xilligii dugsiga.*

*Daniela, 20 sano*

## Gaadiidka

Waxbarashooyinka dhallinyarada ee qofku aanu qaadan mushahar, wuxuu codsan karaa in laga kabo lacagta uu ku raaco gaadiidka. Goobta waxbarashada ka ogow faahfaahinta arrintan.

Ka akhri warar dheeraad ah oo shaqada iyo waxbarashada ku saabsan www.ug.dk.



**Somalisk**

# Dhalinyarada soo socota

## Warbixin ku saabsan waxbarashada oo loogu talagalay dhallinyarada iyo waalidkood

Dhallinyaradu waxay haystaan fursado badan oo waxbarasho, markay dhammeeyaan fasalka 9aad iyo ka 10aad. Buuggani wuxuu si kooban u sheegayaa badi waxbarashooyinkaas. Halkan ka akhri waxbarashooyinka xirfadda, waxbarashooyinka dugsiyada sare, egu, dugsiyada waxsoosaarka iwm, iyo sidoo kale wararka muhiimka ah ee la xidhiidha dhaqaalaha iyo codsiga.

Lataliyayaasha waxbarashada dhallinyarada ayaa laga heli karaa warar dheeraad ah oo faahfaahsan.

**Waxaa daabacday shirkadda Studie og Erhveerv oo la kaashatay Wasaaradda Waxbarashada iyo Wasaaradda Qalobixinta**

Buuggan kooban waxaa laga helayaa: www.vejledningsviden.dk, “Værktøjer for vejleder”